Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

Somali | Soomaali

HAGAHA

# Aqoonta jinsiyadeed ee goobta shaqada

## Horumarinta aqoonta iyo xirfadaha lagu aqoonsado cunsuriyadda

Aqoonta isirnimadu waa aqoonta iyo xirfadaha lagu aqoonsado laguna fahmo cunsuriyadda ka dhex jirta bulshada dhexdeeda. Tan waxaa ka mid ah ogaanshaha halka iyo sida cunsuriyaddu u dhacdo iyo in la aqoonsado, laga jawaabo, lagana hortago inay dhacdo.

Aqoonta isirnimadu waxay dadka ka caawisaa inay aqoonsadaan in cunsuriyaddu ay meel walba kaga jirto bulshada, oo ay ka midka yihiin nidaamyada, qaab-dhismeedka awoodda, dhaqamada shakhsi ahaaneed iyo dabeecadaha. Waxay kaloo dadka ka caawisaa inay abuuraan isbeddel oo ay yareeyaan waxyeelada cunsuriyadda.

Hagahaan waa horudhac ku saabsan aqoonta isirnimada wuxuuna ka kooban yahay macluumaadka:

- waa maxay cunsuriyad
- cunsuriyada sida ay u ekaan karto
- sharciga cunsuriyadda Victoria fikrado kale oo muhiim ah.

# Hagaha aqoonta isirnimada

Aqoonta isirnimadu waa aqoonta iyo xirfadaha lagu aqoonsado laguna fahmo cunsuriyadda ka dhex jirta bulshada dhexdeeda. Tan waxaa ka mid ah ogaanshaha halka iyo sida cunsuriyaddu u dhacdo iyo in la aqoonsado, laga jawaabo, lagana hortago inay dhacdo.

Aqoonta isirnimadu waxay dadka ka caawisaa inay aqoonsadaan in cunsuriyaddu ay meel walba kaga jirto bulshada, oo ay ka midka yihiin nidaamyada, qaab-dhismeedka awoodda, dhaqamada shakhsi ahaaneed iyo dabeecadaha. Waxay kaloo dadka ka caawisaa inay abuuraan isbeddel oo ay yareeyaan waxyeelada cunsuriyadda.

Hagahan waa horudhac ku saabsan aqoonta isirnimada wuxuuna ka kooban yahay:

- waa maxay cunsuriyad
- cunsuriyada sida ay u ekaan karto
- sharciga cunsuriyadda Victoria
- fikradaha kale ee muhiimka ah.

## Waa maxay cunsurinimo?

Cunsuriyada waa fikradda ah in qolo gaar ahi ka hoosayso ama ka sarreyso dad kale. Cunsuriyada waxay kasoo dhex muuqan kartaa nidaamyada bulshada, caqiidada, iyo dabeecadaha xoojinaya sareynta iyo kala duwanaanshaha.

Cunsurinimadu waxay saameyno kala duwan ku yaalataa: dabeecadaha qofka, qiyamka bulshada, iyo dhaqamada hay'adaha. Saamayntaani waxay ka iman kartaa sharciyada, xeerarka, dhaqamada, warbaahinta, fikradaha khaldan, mawqifyada iyo nacaybka (malo-awaal aan cadaalad ahayn ama aaminsanaanta qof dabeecadiisa).

Cunsurinimadu waxay waxyeello u geysataa caafimaadka, bulsho iyo dhaqaale ee shakhsiyaadka, bulshooyinka iyo goobaha shaqada.

Waxa jira saddex nooc oo midab-takoor ah oo is-daba-jooga oo saamaynaya midba midka kale.

### Mid nidaamsan (Systemic)

Midab-takoorka nidaamsan waxa loola jeedaa qaab-dhismeedka, qawaaniinta iyo caadooyinka si toos ah ama si dadban u takoora, ka saaraya, ama u liideysa dadka ka soo jeeda kooxaha la takooro (ama si fudud isir-sooc).

Cunsuriyada nidaamsan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida caadooyinka dhaqameed, sharciyo, iyo nidaamka caqiidada, iyo sidoo kale siyaasadaha, nidaamyada, iyo dhaqamada goobta shaqada.

*Tusaale ahaan:* goob shaqo ayaa iska indho tirto dhammaan dadka aanan magacyo 'aan Australian ahayn' lahayn ee shaqooyinka soo codsado.

### Kan dadka ka dhex jira (Interpersonal)

Cunsurinimada dadka dhexdooda ah waa marka qof takooro, ka saaro, ama uu liido qof (ama koox dad ah) oo ka soo jeeda bulshada la hayb sooco.

Qof kastaa wuu samayn karaa midab-takoor dadka dhexdooda ah, oo ay ku jiraan dadka laftooda laga yaabo inay yihiin bartilmaameedyada cunsuriyadda. Cunsuriyada dadka dhexdooda waxay noqon kartaa mid qofku dareensan yahay iyo mid aanan la dareensaneyn - dembiilaha mar walba ma oga in dhaqankoodu yahay cunsurinimo.

Cunsuriyada dadka dhexdooda waxay noqon kartaa **sarbeeb ah** ama **mid cad.**

**Cunsuriyada qarsoon ee dadka dhexdooda** waxaa ka mid ah gardarrada yaryar, faallooyinka, su'aalaha, mala-awaalka, ama ficillada xoojinaya fikradaha cunsuriyadda ama fikradaha khaldan ee ku saabsan dadka iyo bulshada.

*Tusaale ahaan:* samaynta malo-awaal ku saabsan kartida iyo xirfadaha saaxiibka taas oo ku salaysan midabkooda ama midabka maqaarka.

**Cunsurinimada cad oo dadka dhexdooda ah** waa mid qeexaysa ujeedo iyo/ama dabeecado waxyeello leh oo muuqda oo lagula kacayo qof kale ama koox sababo la xiriira jinsigooda.

*Tusaale ahaan:* xubnaha shaqaalaha ee diida in ay la falgalaan ama la hadlaan asxaabta ka soo jeeda asal ahaan jinsiyadaha la takooro iyadoo sababtuna ay tahay inay u arkaan inaysan la sinayn.

### Tan gudaha (Internalised)

Cunsuriyada gudaha ah waa marka uu qof rumaysto ama uu xataa taageero fikradaha cunsuriyadda, ama dabeecadaha ku saabsan isirkooda ama koox dhaqameedkooda. Tani waxay keeni kartaa in dadku ay si kala duwan u qariyaan ama u soo bandhigaan shaqsiyadooda iyo dhaqankooda, aragti xun ka qaataan shaqsiyadooda, ka fogaadaan ama xitaa weeraraan bulshadooda iyo dhaqankooda.

*Tusaale ahaan*: qof dhalinyaro ah isla markaasna Australiyaan ah oo ka soo jeeda Jaziiradaha Baasifiga ayaa rabo inay noqdaan cilmi-baare laakiin waxay aaminsan yihiin inaysan taas ayaga boos uga banaaneyn sababo la xiriira fikrado khaldan oo ah in Jaziiradaha Baasifigga dadka kasoo jeedo kuwo 'aan la isku halayn karin' sidaas darteed iska uusan diiwangelin waxbarashada.

## Muxuu sharciga Victoria ka qabaa cunsuriyadda?

Waayo aragnimada qaar ee cunsuriyadda ayaa laga yaabaa in aysan sharciyadan ku jirin. Si kastaba ha ahaatee, cunsuriyaddu waa sababta keenta takoorka jinsiyadeed iyo aflagaadada jinsiyadeed, sidaas darteed isku day kasta oo macno leh oo lagaga hortagayo loogana jawaabayo cunsuriyadda ayaa sidoo kale wax ka qaban doona dabeecadahaas.

***Sharciga Fursadaha loo siman yahay 2010* (Vic)**

| VICTORIA | DAWLADA DHEXE |
| --- | --- |
| *Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay 2010*<br><br>*Xeerka Dulqaadka Jinsiga iyo Diinta 2001* | *Xeerka Takoorka Jinsiga 1975* |

Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay (The Equal Opportunity Act - EOA) ayaa ka mamnuucaya Victoria takoorka ku salaysan jinsiyadda, meelaha qaarkood ee nolosha dadweynaha, oo ay ku jirto shaqada. Marka la eego EOA jinsiyada micnaheedu waa qof midabkiisa, faraca ama abtirsiimada, dhalashadiisa, asalka qowmiyadeed, ama sifooyin kasta oo la xidhiidha jinsiyad gaar ah.

Takoorkani wuxuu noqon karaa mid **toos ah** ama **mid dadban**.

**Takoorka tooska ah** wuxuu dhacdaa marka qof loola dhaqmo si aan wanaagsanayn ama si xaq darro ah sababo la xiriira isirkiisa awgeed.

*Tusaale ahaan:* maareeyuhu wuxuu dallacsiiyay shaqaale cadaan ah meeshuu ka dallacsiin lahaa Vietnamese tayo badan, ku habboon doorka, oo ka soo shaqeeyay hay'adda muddo dheer.

**Takoor dadban** waa marka la sameeyo xeer, shuruud ama dhaqan qof walba khuseeya balse dadka qaar si xaq-darro ah u saameeya jinsiyaddooda awgeed.

*Tusaale ahaan*: dhammaan shaqaaluhu waa inay iska bixiyaan wax kasta oo madaxa lagu xidho iyo dahabka marka ay galayaan sawirada aqoonsiga. Tani waxay noqon kartaa takoorid aan toos ahayn haddii qaanuunku uu waxyeeleeyo dadka xidha xijaabka iyo waxyaalaha kale ee loo xirto dhaqamada (oo aan ahayn kuwa aan xidhin) taasina ma aha wax macquul ah.

**Masuuliyad wanaagsan** waa waajibaad sharci ah oo hoos yimaada EOA oo ah in milkiilayaasha loo shaqeeyo ay qaadaan tillaabooyin firfircoon, macquul ah iyo saami qaybsi si ay uga hortagaan takoorka, dhibaataynta galmada, iyo in qofka la dhibaateeyo intii karaankooda ah.

Tusaalooyinka sida loo fuliyo waajibaadka togan eeg Cutubka 4-aad. Fahamka waajibka togan *ee Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada*

***Xeerka Dulqaadka Jinsiga iyo Diinta 2001* (Vic)**

Xeerka Dulqaadka Jinsiga iyo Diinta wuxuu mamnuucayaa isir iyo diin **aflagaado loo geysto**. Aflagaado waa dhaqan dadwayne oo ku dhiirigaliya in ay nacaan ama ku qoslaan qof ama koox dad ah taas oo ku salaysan midabkooda ama diintooda.

*Tusaale ahaan*: qof ayaa si been abuur ah u dacweeyay shaqaale ka soo jeeda qowmiyad ka duwan mida uu kasoo jeedo marka xatooyo ay ka dhacdo xafiiska, isaga oo ku andacoonaya in ay tahay dhaqanka caadiga ah ee jinsiyaddooda iyo in 'dadka iyaga oo kale ah ay dalka ka dhigaan mid aan ammaan ahayn'.

***Xeerka Takoorka Jinsiga 1975*** **(Cth)**

Xeerka Takoorka Jinsigu waa sharciga faderaalka ee takoorka- jinsiyadeed ee Australia wuxuuna Australia mamnuucayaa takoorka ku salaysan isir, midab, asal ama asal qaran ama qowmiyad. Tan waxa kale oo ka mid ah takoorka ka dhaca shaqada.

## Waxyaabaha muhiimka ah

Luuqadda aan isticmaalno si aan uga hadalno cunsuriyadda waa muhiim, balaadhan, wayna is badashaa marba marka kasii dambeysa. Luuqadda la isticmaalo waxa laga yaabaa in aanay buuxin baahida qof walba. Si kastaba ha ahaatee tani waa dulmaris aasaasi ah oo ku saabsan fikradaha muhiimka ah ee la xiriira akhris-qoraalka jinsiyadeed.

## Badbaadada dhaqanka

Badbaado dhaqameedku waa fikrad ay abuureen xirfadleyaasha Māori ga, taas oo lagu daray macnaha guud ee Australiya oo ay u badan yihiin Ummadaha Kowaad tilmaamaysana jawiga goobta shaqada taas oo qiraysa isla mar ahaantaasna qiimaynaysa aqoonsiga dhaqan ee qofka iyo waaya-aragnimadiisa, halkii ay u hanjabi lahayd ama wax u dhimi lahayd.

*Tusaale ahaan:* Shaqaale ayaa helay tababar ku saabsan aqbalida kala duwanaanshaha dadka ee goobta shaqada iyo in si xushmad leh loola macaamilo asxaabta ka soo jeeda asal ama diin kale.

## Qeybaha kala duwan (Intersectionality)

Qeybaha kala duwan (Intersectionality) waxay sharaxeysaa sida nolosha qofka ay u yeelan karto aqoonsiyo is-dhexgal kala duwan tusaale, lab iyo dhedig, jinsi, nooca galmoodka, asalka dhaqan-dhaqaale, naafanimo, iyo inay la kulmi karaan noocyo kala duwan oo takoorid ah ama 'takoorka qaybaha kala duwan ah'.

*Tusaale ahaan*: haweeney aan cadaan ahayn oo ka niyad jabsan howlaha xafiiska ayaa loogu wacaa qof 'cadhaysan, baqaysa isla markaasna aan ku habboonayn hoggaaminta' halka nin cad oo muujinaya dareen kaas oo kale ah lagu tilmaamo 'qof xamaasad leh'.

## Mudnaanta qofka la siiyo (Privilege)

Mudnaantu waa eexasho ama ilaalin ay dadka ama kooxaha qaar ka helaan bulshada dhexdeeda. Mudnaanta qofka la siiyo waxaa caadi ahaan loo adeegsadaa macnaha mudnaanta cad, halkaas oo dadka caddaanka ahi ay ka helaan eexashooyin ayaga loo eexanayo iyo ilaalin gudaha Australia taas oo aan si siman loo wada siin dadka dhan. Taas waxaa sabab u ah gumeysiga iyo dhaqamada kale ee taariikhiga ah iyo kuwa joogtada loogu dhaqmo ee si badheeh ah ama aan ula kac ahayn ugu xaglinaya dadka cadaanka ah.

*Tusaale ahaan:* shaqaale caddaan ah oo codsaday fasax si uu uga qayb galo aaska qof ka mid ah qoyska ayaa helaya fasax ayadoo aan wax dabagal ah lagu sameyn. Qof shaqaale kale ah oo kasoo jeeda Ummadaha Koowaad ee codsaday fasax dhaqameed uu ugu laabanayo dalka si uu uga qeyb galo xaflad ayaa looga baahan yahay inuu bixiyo shahaado iyo inuu bixiyo faahfaahin gaar ah ka hor inta aan codsigooda la ansixin.

### Isir ku dhaqanka (Racialisation)

Isir ku dhaqanka (Racialisation) waa hab siyaasadeed iyo hab bulsho oo lagu qeexo kooxaha sinjigooda. Waxay isticmaashaa jinsiyad si ay u sharaxdo kala duwanaanshaha ama rajooyinka kala duwan ee kooxaha dhexdooda. Isir ku dhaqanka waxaa inta badan loo adeegsadaa in lagu takooro kooxaha ama lagu go'aamiyo meesha ay kaga jiraan bulshada, sidaas darteed kooxaha qaar waxay noqdaan kuwo ' isirkooda si taban loo soo bandhigo'.

*Tusaale ahaan:* 'Ragga Afrikaanku waa ay dagaal badan yihiin, rabshado badan yihiin anshaxna maleh'. Tani waa isir sooc (aan wanaagsaneyn) sababtoo ah waxay soo jeedinaysaa in tani ay tahay sida dhammaan ragga Afrikaanka ah laga filan karo inay u dhaqmaan ayna keeni karto in la takooro.

Eeg lifaaqa A: shuruudaha muhiimka ah ee Guddiga *Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada* Hordhac kooban oo ku saabsan ereyo kale oo muhiim u ah dhisidda aqoonta jinsiyadda iyo cutubka 2 'Fahamka cunsuriyadda' si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mawduucyadan.

**Hagahan waxa uu si kooban u soo bandhigayaa fikradaha akhris-qoraalka jinsiyadeed. Waa talaabada ugu horreysa ee ay qaadi karaan dadka doonaya inay noqdaan kuwo cunsurinimada diidan. Waxaan dhiirigelinaynaa tababaro dheeraad ah iyo tallaabooyin kale oo waxbarasho.**

Wixii macluumaad dheeraad ah, soo dejiso Guddiga *Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada* laga heli karo Humanrights.vic.gov.au/resources ama iyada oo loo marayo lambarka QR.

*Macluumaadkan waxaa loogu talagalay hagid ahaan kaliya. Ma aha beddelka talo sharci.*

# Nala soo xiriir


| | |
|---|---|
| Khadka weydiinta | 1300 292 153 ama (03) 9032 3583 |
| Fakis | 1300 891 858 |
| Gudbinta Codka NRS | 1300 555 727 ka dibna sheego 1300 292 153 |
| Turjubaano | 1300 152 494 |
| Iimaylka | enquiries@veohrc.vic.gov.au |
| Mareegta | humanrights.vic.gov.au |
| Nagala soco Twitter ka | twitter.com/VEOHRC |
| Facebook-ga naga raadi | facebook.com/VEOHRC |


***humanrights.vic.gov.au***